

Miyaan kharash bixin doonaa?

Haddii cunuggaaga ku qoran yahay Takhtarka Guud (GP) ee Sheffield waxaad u baahan doontaa oo kaliya inaad farmashiyaha ka buuxiso foom. Daawoyinka lagu siiyo waa u bilaash carruur walba.

Marmar farmashiistaha wuxuu kugu talin karaa inaad qaadato daawo kharash ku fadhiyo. Haddii aad xulato inaad isticmaasho daawada ay kugu taliyaan waxaad bixin doontaa kharashka daawadaas.



Waa kuwee farmashiyayaasha adeeggaan bixin karo?

Gaar ahaan farmashiye walba ee Sheffield ayaa adeeggaan baxsho. Waxaa jiro farmashiyoyin badan ee furan saacado ka dheer kuwa caadiga ah.

Adeeggaan waxaa sameeyo NHS Sheffield CCG si ay taageero xannaano u siiyaan bukaanada Sheffield.

Su'aalo walba ee ku saabsan adeeggaan, fadlan la xiriir:-

Medicines Management
Team 722 Prince of Wales
Road, SHEFFIELD, S9 4EU
Tel: 3051000

Shaabbada ama calaamada farmashiyaha (haddii uu habboon yahay)



www.nhs.uk

www.sheffieldccg.nhs.uk

[f /SheffieldCCG](https://www.facebook.com/SheffieldCCG) [@NHSSheffieldCCG](https://twitter.com/NHSSheffieldCCG)

Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa bogga internetka NHS Choices: www.nhs.uk

Pharmacy 1st

Adeegga Jirrooyinka fudud Carruur



Working with you to make Sheffield

HEALTHIER

Waa maxay adeegga jirroyinka fudud?

Adeegga jirroyinka Fudud waa adeeg uu baxsho farmaashiistaha si uu daaweeyo bukaanada xaq u leh daawo bilaash ah iyo ku qoran takhtaraka Guud (GP) ee Sheffield. Adeegga wuxuu Sheffield. Adeegga wuxuu bukaanadaan siinayaa awood ay jirroyinka fudud u helaan talo caafiimaad iyo daawo bilaash ah ayagoo u tegin takhtararkooda.

Miyuu cunuggayga xaq u leeyahay adeegga?

Cunug walba (ee ka yar 16 jir) oo ku qoran GP ku yaalo Sheffield ayaa si otomatik ah xaq u leh adeegga.



Waa maxay jirroyinka lagu daaweyn karo adeeggaan?

Farmaashiistaha ayaa cunuggaaga daaweyn karo haddii ay qabaan hal ka mid ah xaaladahaan:

Fangaska cagta
Injir
Bus bus
Qaniinyada cayayaanaka iyo micoyo Nabrahaha afka
Firiirica xafayadda
Daarka: bakteeriyoy jiraan
xiisad

Sankoo caburan
Calaamadaha hargabka
Xanuun joojiye
Xanuun joojiye
Calool-fadhi
Dhuun xanuun
Cudurka maqaarka
Ilko soo bax

Shuban
Gandho
Xannuunka caadada
Dirxi
Dhago xanuun
Cabeebka (xittaa midka afka)
Xasasiyad
Ilko xanuun

Daawada baracetamol waxaa la siin karaa carruurta ka wayn labo bilood jir haddii ay qabaan xanuun iyo jirro yar, xummad iyo tallaalaka carruurnimada kadib.

Farmaashiistaha ayaa ku weydiin doono su'aalo ku saabsan cunugga iyo calaamadaha xannuunkooda. Waxay go'aamin doonaan haddii ay siin karaan daawo ayagoo loo tegin takhtar. Haddii ay u maleeyaan in loo baahan yahay takhtaraka, waxay kugu talin doonaan inaad u tegto GP, adeegga GP'ga markuu xafiiska xiran yahay (ballan la'aanta ah) iyo marar dhif ah qaybta Deg-degg ah ee isbitaalaka.

